U QOR IYADA



"Haddii aad jeceshahay qof u tag qofkaas oo usheeg in aad jeceshahay waayoo Allaah swt waa uu neceb yahay waxa farxadda leh in la qariyo, Noqo qof adag„

Qoraa
Muxammad Al Baqer

Tarjume
Muxammad Cabdi Faarax

U QOR IYADA

-Qoraagga

Muxammad Al Baqer

Tarjume

Muxammad Cabdi Faarax

TUSMO

BADDA RAJOOYINKA 8
CAQLI WAALAN..... 13
QALBI QAANGAAR AH 16
XILLIYADA AFARTA AH 18
WADADA HALAAGA..... 21
SIDEEN U FASIRAA JACEYLKEEDA 23
HORAY MAKUUGU SHEEGAY 26
WAXYAABO AY ADAG TAHAY SHEEGIDOODA ... 32
AAMUSNAAN 35
DAREEN CAJIIB AH..... 37
MIYEY WANAAGSAN TAHAY..... 39

Arrintu waxa ay u egtahay sida adiga oo dhex taagan qol, oo aan laguu ogoleyn in aad wax ku tiirsato…

Haddii aad jeceshahay qof u tag qofkaas oo usheeg in aad jeceshahay waayoo Allaah swt waa uu neceb yahay waxa farxadda leh in la qariyo, Noqo qof adag...

BADDA RAJOOYINKA

***

Jeclaan lahaayaa in sheekadeennu dheeraato ay saacado badan qaadato iyada oo aysan nasoo dhex galin wax hakad ah, laakiin taasi waa rajo oo kaliya.

Markii ugu horreysay ee aan arkay iyada waxaan dareemay dareen aad ula yaab badan, waxaan dareemay sida inaan ahay malaa'ig muuq banii aadam leh.

Markii aan arkay wax walba waxa ay igu noqdeen layaab, xamaasaddayduna waxa ay noqotay mid dagdag ah, ma garanaayo waxa igu dhacay, waxaan dareema sida in aan ku dhex jiro godka jaceylkeeda…

Markii aan dhageysanaayay sheekadeeda waxaan marwalba si mug leh u dhageysanaayay tafaasiisha erayada kazoo baxaayay gunta qalbigeeda, sida in ay caqligeyga ka dhex raadineyso meel ay dagto…

Had iyo jeer waxaan aad uga fikiri jiray wax walba oo iyada ku saabsan xitaa waxa ugu yar, in kastoo ay aad u yareyd sheekadeenna, balse waligeed kama aysan bixin maskaxdeyda xitaa hal daqiiqo…

Maxaad qalbigeyga u gashay aniga oo markii hore go'aan adag ku qaatay in aanan waligey cidna jeclaan, balse wax walba waxa ay ku dhaceen si kadis ah, sida inaan mar kale qarqmi doono badda rajooyinka…

Sheekadu saqda dhexe waxa ay lamid aheyd sida maalin qurxoon oo kale, codkeeduna waxa uu laxamo qurxon ku sameynaayay qalbigeyga.

Wax walba waxa ay is badaleen maalmihii tagay waxa ay ila nopqotay sida in jaceylka uu isii jiidanaayo aniguna aan iska celin Karin…

***

Maalintii aanan maqlin codkeeda waxa uu iila mid yahay maalin xun oo aan wanaagsaneyn…

***

Maalintii aan fiicnaaday waxay noqotay mid ka sii yaab badan markii aan u duulay hawada sare Waan jeclaaday oo **indhaheeda** ayaan jeclaaday.

***

Waxaa aan ka baqi jiray marwalbo in aan u sheegto waxa qalbigeyga ku jiro oo dhan, aad ayaan uga laba labeyn jiray arrinkaas, waayoo ma aanan aqoonin sida aan erayada iskugu aadn lahaa aniga oo indhaheeda hortaagan, waxa aab dareemi jiray sida in afkeygaba uusan hadli karin.

***

Waxaan ku dhaartay rabbiga abuuray dhoolasheeda quruxda badan waxaan aad ugu xiisay maalmihii.... p:8

***

Waxwalba oo aniga igu saabsan ayey aad u daneyn jirtay sida in ay i jeceshahay oo kale, anigana sidaas oo kale ayaan u daneyn jiray balse ma aanan ogeyn in ay i jeceshahay iyo in kale, wuxuu ahaa dareen aad u adag.

***

Waxwalba oo ay jeceshahay ayaan aad u dhageysan jiray waayoo codkeeda qurxoon ayey iigu sheegi jirtay.

***

Maxey waxaan oo dhan kadis u noqdeen.

***

Rajadeyda ugu weyn waxa ay aheyd in aan arko iyada oo dhoolacadeyneyso.

***

Maxaan sidaan oo dhan ugu noqday qof ku waalan jaceylkeeda, sida in aan horay u arkinba qof iyada oo kale ah.

***

Jaceylka aan u qabay iyada waxa uu ahaa mid muuqdo oo nadiif ah oo aanan laheyn xujooyin iyo waxyaabo kale.

***

Maxaad igu sameysay oo maskaxda iga qaaday ilaa heer ay erayadii iga kala lumaan

***

Rajadeyda ugu weyn waa indhaheeda, heesteyda ugu qurxoonna waa codkeeda, sideen ula dagaala iyada.

***

Sideed ku baraneysaa sharciyada jaceylka, adiga oo isla markaas ka baqaayo in aad wax jeclaato.

CAQLI WAALAN

***

In kasta oo aan ku naafoobay jaceylkeeda balse waxa aan dareema sida in aysan waligey waxba igu dhicin

***

Waan ogaa cidna in aysan ii dulqaadan karin, sidoo kale waan ogaa qof lagu caajiso in aan ahay oo cidna aysan i aqbaleyn.

***

Waan ogahay qof lagu caajiso in aan ahay, waan ogahay qof aan hadal badneyn in aan ahay waan ogahay in aan ahay qof niyad jabsan, oo noloshiisa oo dhan ay cidladaas ku dhamaatay, tareenka noloshana uu iga tagi rabo

***

Waan ogahay in aanan aheyn qof soo jiidasho, jirkeygana uusan dhisneyn waan ogahay taas

dagaalkeyga in ay tahay, balse adiga Ayaan kuu baahanahay, waxaan kaaga baahanahay garab aan la tilmaami karin

***

Aad ayey u qurux badneyd oo waxa ay mudneyd in ay quruxda hoggaan u noqoto.

***

Adigaa ka hor nolosheyda ma aanan helin qof ay nolosheyda sidaan u jeclaato

***

Indhaheeda ayaan ka dhex arkay hir aan laga hortagi karin, markaas ayaan dabaashay balse waxa aan ku dhex maanshooday indhaheeda sida aan waligeyba horay u dabaalanin oo kale.

***

Waxaad aheyd mid buuxiso waxwalba oo gudaheyga ah.

***

Adduunkaan ugama baahni waxa aan ka aheyn udgoonka carafta badan ee aan dharkeeda ka carafsanaayo.

***

Waxa aan aad u sugaayay maalinta kulankeenna si aan kuugu sheegto jaceylkeyga, runtiina aad ayaan ugu xamaasadeysnaa arrintaas balse waxaa aan ka fikiraayay diidmo xaggaaga ah, maxaan sameeyaa ma sidaan ayaan ku noolaada mise arrinta waa ay isbadeli doonntaa.

***

Erayada iyo buugaagta ayaan ka dhex raadin jiray wax aan dareenkeyga kuugu cabiro, balse waan waayay erayo igu filan oo aan dareenkeyga ku cabiri karo.

***

Muxuu jaceylku sidaan oo dhan ugu adag yahay.

QALBI QAANGAAR AH

***

Malaga yaabaa in ay timaado maalin riyooyinkeyga oo dhan ay ii rumoobayaan, adigana aan ku hantinaayo, farxad dhameystirana aan helaayo, malaga yaabaa in ay timaado maalintaas.

***

Jaceylkaaga dartiis Adduunka oo dhan ayaan ula dagaalamaayaa iyo cid walba oo horteyda istaagto, balanteydana waan kuu oofin doonnaa, waliba adiga dartaa.

***

Waxwalba waxa ay noqdeen kadis, jaceyl iyo daneyn, balse adiga ayaan aad kuu jeclaaday qalbigeygana adiga ayuu kugu waashay ee intaas makugu filan tahay.

***

Maalinba maalinta ka danbeyso jaceylkeeda ayaa igusii badanaayay sida samada oo midabkeedu

isbadelay oo kale, hawaduna ay noqotay mid nadiif ah.

***

Sugitaanka muxuu sidaan oo dhan ugu adag yahay ilaa heer aan la tilmaami karinba.

***

Malaga yaabaa in ay timaado maalin oo aan kaligey joogi doonno sida aan markii horeba ahaa, ma ii noqoneysaa wehel qurxoon mise dhabarka ayaad iga tooganeysaa oo waqtiga ayaad iiga hiilineysaa, malaga yaabaa haddii aad aragto erayadaan in ay wax isbadelaan?

XILLIYADA AFARTA AH

***

Kawaran haddii la gaaro deyrta, malaga yaabaa caleemaha jaceylkeeda in ay daataan.

***

Kawaran haddii la gaaro xaggaaga qabowga badan miyey noqon doontaa sida buuraha barafka mise qalbigeyga ayaad hawo qaboow badan ku afuufeysaa si uu u qalalo oo aan u dhinto.

***

Kawaran haddii la gaaro jiilaal ma dhagaxa ayey ka kululaan doonta, mise holaca Xiisaha iyo jaceylka ayey igu gubi doonta.

***

Kawaran haddii uu yimaado Gu' ma sida balan baalista ayey hawada ku duuli doonnta.

***

Haddii jiilaalku qaboow yahay... waxa aan rabaa in aan qalbigaaga uga dhuunto si aan diirimad uga helo.

***

Xitaa haddii xaggaagu uu kulul yahay waxa aan rabaa in aan kusii kululaado jaceylkaaga!

***

Haddii caleemadaha geeduhu daataan xilliga deyrta, waxa aan jeclaan lahaa in aan ku dhaco qalbigaaga oo aan ku dhex milmo, gugana waxa aan ka baqaayaain hilowga uu iga tan bato waayoo waxa aan dareemaayaa xiisaha in uu yahay catarkaaga!

WADADA HALAAGA

***

Waxa aan u maleeyaa in aan kamid ahay dadka guuleystay aniga oo si aad ah ugu dhex maanshooday jaceylkaaga.

***

Waxwalba si dagan ayey iiga istaageen!

***

Waxa ay u egtahay doorka nolodha aan ku leeyahay in uu yahay in aan dhinto aniga oo ku raadinaayo adiga.

***

Gabadhaas si aad ah Ayaan u jeclaaday sidii in adduunkeyga u dhamaanaayo haddii aan iyada arki waayo.

***

Sidaan aad tahay Ayaan kugu jeclahay waayoo dareenkeyga oo dhan si kooban kuuguma sharixi karo waayoo waa ay adag tahay waxa aana ka baqaayaa in aan ku waayo!

SIDEEN U FASIRAA JACEYLKEEDA

***

Siduu idin la yahay jaceylkeeda?!

Kaliya waa in ay dhoolacadeyso inta aysan hadlin iyada oo aan waxba ii sheegin!

***

Siduu idinla yahay jaceylkeeda?!

***

Siduu idinla yahay jaceylkeeda?!

Jaceylkeeda waxa uu ii yimid isaga oo aan wax sabab iyo shuruud ah midna wadanin, sida in uu yahay qadar la ii qoray oo aysan cidna badeli Karin.

***

Siduu idinla yahay jaceylkeeda?!

Ma waxaad umaleysaan jaceylka in la tilmaami karo, ma waxaad umaleysaan erayadeyda in aan kusoo koobi karo jaceylkeeda!

Sideen ahaa sideese Noqday?!

Waxa aan lamid noqday qof waalan oo aan waxba ogeyn, sideen wax ku ogaadaa iyada ayaaba ah wax iigu muhiimsan ee aan heysto'ee, sideen wax isku weydiiyaa, ma su'aal ayaa ii furan?

Adinkun waxa aad iweydiineysaan sababta aan u jeclaaday! Waayoo waxa ay igu soo jiidatay codkeeda marwalbana waxa aan rajeyn jiray in aan agteeda wax uun ka noqdo!

HORAY MAKUUGU SHEEGAY

***

Horay makuugu heegay?!

Xitaa farriimahaaga yaryar qalbigeyga farxad In ay ka buuxiyaan!

***

Horay makuugu sheegay?!

Sheekadaada maalin laha ah in ay ii tahay dhiiragalin iyo farxad, jaceylkaagana la igu imtixaamay!

***

Horay makuugu sheegay?!

Jaceylkaaga in uu igu kalifay in aan jeclaado waxyaabaha aad jeceshahay adiga waayoo adiga ayaa jecel!

***

Horay makuugu sheegay?!

Duruuf walba oo inasoo marta iyo xaalad walba in aan marwalba qalbigaaga daris la ahaan doonno waxwalba oo dhaco iyo si walba oo aan u kala fogaano!

***

Horay makuugu sheegay?!

In uusan jirin qof dhoolacadeynteyda xakameyn karo oo aan adiga ka aheyn!

***

Horay makuugu sheegay?!

Maalintii aan ku bartay in aan jeclaaday bishii aan ku bartay iyo maalmaheeda oo dhan!

***

Horay makuugu sheegay?!

In aad adiga o kaliya tahay jaceylka kaliya ee aan maalin walba ku noolahay!

***

Horay makuugu sheegay?!

Marnaba In aan kaa fogaan doonin xitaa haddii aad iga fogaato adiga oo aad igu tuurto god aan dhamaad laheyn, waa laga yaabaa mararka qaar xaalada in ay igu adkaato balse waan u dulqaadan doonnaa si aan qalbigaaga iyo jaceylkaaga u hanto!

***

Horay makuugu sheegay?!

Dulqaadka iyo sabarka aad iga arkeyso in uu ku hoos duugan yahay xanuunka qalbi aamusan!

***

KAWARAN HADDII!

Kawaran haddii aad go'aansato in aad is disho kaliya si aad u dhimato, ogoow xitaa haddii ay ku badbaadiyaan waxa aad noqoneysaa meyd socdo!

***

Kawaran haddii aan jaceyl xad dhaaf ah jeclaado, ma jaceylkeeda Ayaan udhimanaa mise fikir aan iyada ka fikiraayo, mise inta nolosheyda ka dhiman wadada Ayaan dhex taagnaana!

***

Kawaran haddii dunidaan ay ku tilmaamto mid dhamaad ah in ay tahay, jaceylkeeduna uu yahay duufaantii burburin laheyd adduunka!

***

Kawaran haddii aan un sadar u qoro oo aan u aqriyo maxaa dhici karo? Ma waxwalba sidooda ayey ahaanaayaan mise dhinaca kale ayey isku badelayaan!

***

Kawaran haddii aan jaceylkeyga usheegto, sida ay hadda ii tahay miyey ii ahaaneysaa mise waxa ay igu ridi doonntaa godka jaxiimada iyo halaaga!

***

Kawaran haddii aad adigu fahanto erayadaas malaga yaaba in aad iigasoo jawaabto mise wad I cidleyneysaa.

***

Kawaran haddii aad I cidleyso, ma sideyda Ayaan ahaan doonnaa mise noloshaan Ayaan isaga tagi doonnaa aniguna!

***

Kawaran haddii ay hadalka dhameyso aniga oo aan usheegin waxa gudaheyga ku jiro, sideen u noolaan doonnaa inta nolosheyda ka dhiman!

***

Kawaran haddii aan usheegto waxa gudaheyga ku jiro, ma dhibka ayaa iga yaraanaayo oo waxa aan ku dalxiisayaa beeraha jaceylka, mise waa ay iga carareysaa oo waxa ay igalineysaa nolol mugdi ah.

***

Kawaran haddii aysan waligeed iga fikirin waligeedna aysan I jeclaan, maxaan sameyn karaa sideese nolosha ugu dhameysan doonnaa wadadaas mugdiga ah!

WAXYAABO AY ADAG TAHAY SHEEGIDOODA

***

Sideen ugu sheegtaa waxa gudaheyga ku jiro oo dhan?!

***

Sidey macquul ku tahay in ay I jeclaato iyada oo aan wax dareen ah ii qabin!

***

Sideen ku ogaadaa jaceylka ay ii qabto inta uu la egyahay?!

Waxaadba moodaa jaceylkeeda wadada saxan un uu iga leexiyay!

***

Waligeed makaa fikirtay maalin uun?

Sideen ku ogaadaa!

***

Marwalba waxa aan u sheegi jray dhoolacadeynteeda in ay tahay waxa ugu qaalisan ee aan heysto

***

Miyeey ogeyd marka ay farriimaha igala soo daahi jirtay in aan dareemi jiray walwal aan la tilmaami Karin!

***

Haddii ay ogaan laheyd jaceylka aan u qabo inta uu la egyahay, qalbigeeda Ayaan qasri ka dhisan lahaa!

***

Haddii wadada gurigeeda loo maro ay ahaan laheyd mid qodxa badan oo aan lagu socon Karin, waan ku socon lahaa aniga oo aan dhinacna u jeesan! Xitaa haddii helideedu ay adkaan laheyd meel walba Ayaan ka raadin lahaa si aan u helo!

***

Haddii indhaheedu ay ahaan lahaayeen bad, waxa aan diyaarsan lahaa doonteyda waxa aana ku dhex safri lahaa badda jaceylkeeda aniga oo aan wax

kaleba ku fikirin, xitaa haddii aan ku dhex maashoodo badda jaceylkeeda uma baahni in la igasoo bixiyo meeshaas Ayaan ku dhex jiraayaa ilaa aan ka dhinto!

***

Malaga yaabaa dareenkaan cajiibka ah in uu maalin uun dhamaado?!

***

Aniga iyo culuyskeyga oo dhan waxa aan cuskanahay qalbigaaga ee ha ina hoojin!

***

In badelka uu noqdo sabarka inta uu la egyahay waa waxa aan aaminsanahay ee aan ku rajo weynanahay!

AAMUSNAAN

***

Aamusnaantu waxa ay ku siineysaa raaxo iyo daganaan aad ugu soo dalxiisi karto caqliyada dadka kale!

***

Aamusnaanta mararka qaar waxa ay kugu kalifeysaa in aad weydo dadka qaar, waayoo waxba uma sharixi kartid sida ay wax u jiraana uma sheegi kartid!

***

Aamusnaanta waa mida kaa dhigeyso in aad soo kacdo adiga oo faraxsan, sidoo kalena aad seexato adiga oo walwalsan!

***

Aamusnaanta wa mid kamid ah waxyaabaha kugu kalifi karo in aad weydo naf aad said u jecleyd!

****

Aamusnaanta mararka qaar waxa ay noqotaa wadada ugu fudud ee aad uga taqalusi karto dadka kale, balse marwalba ma ahan

DAREEN CAJIIB AH

***

Dareen cajiib ah qalbigeyga kusoo dhacay, sida in aan aniga kaligey galaayo dagaalka nolosha.

***

Maxaa dhacay oo sidaan dhan aad jaceylkeeda ugu iloowday.

***

Markii aad iisoo laabatay waxa aan dareemay karti iyo geesinimo iyo in aan horay u socon karo, balse waxaa si kadis ah aan ula ku lmay daciifnimo taas oo igu kaliftay in aan istaago oo aan dhinacyadeyda eego.

***

Markii aan jeclaaday waxa aan dareemay dareen cajiib ah sida aniga oo ku dhagan xarig aan dhamaad iyo bilaaw midna laheyn.

***

Marka aan damco in aan ubandhigto waxa qalbigeyga oo aan u sheegto dareenkeyga waxa aan la kulmaa dareen cabsi badan, waxa aan isweydiiyaa su'aalo badan oo ay kamid yihiin,

- Sideen ku bilaaba?
- Halkeen ka bilaaba?
- Maxaan u sheegayaa?
- Suurtagal ma tahay in aan usheego?

***

Haddii aan bilaabo maxaan dhahaa? Haddiise aan dhaho warkeyga mala qaadanayaa?

Halkeen ka bilaaba? Marka aan iyada arko hadalka oo dhan ayuaaba iga lumee.

Maxaan u sheegaa? Maba aqaano si aan ugu tago'e

Suurtagal ma tahay in aan usheego? Aniga oo aan ila iyo hadda warba u heynin jn ay I jeceshahay iyo in kale.

MIYEY WANAAGSAN TAHAY

***

Ma wanaagsan tahay jacelka xilli hore in la sheegto, haddiise aad sheegato malaga yaaba qofka kale in aad weydo!

***

Haddii jaceylka sheegashadiisa ay wax caadi ah tahay, maxaad jaceylkaaga la sheegan la' dahay?!

***

Ma wanaagsan tahayin la qirto?!

Adiga oo ka baqaayo dareenkaas in aad muujiso, kana fikiraayo in qof kale uu kaa hormari karo, maxaad u smeyn la'dahay?!

***

Waa macquul in aad shalaaydo haddii jaceylkaaga aad sheegato, xitaa waxaa macquul ah qofka aad

jeceshahay in aad weydo, sugitaanka waxba kuguma soo kordhinaayo labada jeerba!

***

Haddii aad jeceshahay qof, u tag qofkaas oo u sheeg dareenkaaga, waa macquul in aad guuleysato sidoo kale waa macquul in aad fashilanto, haddii aad guuleysato noloshaada inta ka dhiman waad faraxsanaaneysaa, haddiise aad fashilanto culeyska ayaa kaa dagaayo shaki la'aan!

Si qoto dheer uga fikir inta aadan bilaabin tilaabooyinkaan, qorsheyna sida aad ku bilaabi laheyd, sidoo kale ogoow hadalkaaga in ay wax ka dhalan doonnaan, u diyaar noqo natiijo walba waayoo nolosha nafhurnimo, marar badan isku day kuna celceli si aad hadafkaaga u xaqiijiso!

***

Haddii aad rabto xaqiijinta hadafkaaga in aad go'aan yeelato oo aad sabarto waa muhiim, xaqiijinta hadafkaaga in aad u socotana waa muhiim!

***

Haddii aad leedahay riyo, riyadaas sida aad u xaqiijin laheyd u dadaal, hana fiirin waxyaabaha ka dhalan karo, naftaada wax u noqo, cidna waxba kuuma qabaneyso, dadka oo dhan marka aad dhacdo waa ay kaa tagaayaan!

***

Marwalba dooro qof kugu munaasab ah, waayoo waa qofka kaliya ee kugu garab siin karo xaqiijinta hadafkaaga iyo riyadaada!

***

Marwalbo fiiri kor oo waxyaabaha wanaagsan si aadan u noqon tixsi oo aadan meelaha hoose qurunka ah aadan ugu mashquulin!

***

Xaqiijinta hadafkaaga waa waxa ugu wanaagsan ee aad heli karto, marwalba horay usoco oo dooro wado wanaagsan, waa muhiim in aad wax beerato balse u dagaalan sida aad waxaas usoo saran laheyd!

***

Ogoow jaceylku waa dagaal aan si wada jir ah uwada galnay aniga iyo adiga, innaga oo mid ahna waan ka bixi doonnaa dagaalkaas waxwalba oo dhaco, waxwalba oo aan weyno, shaki la'aan waan guuleysan doonnaa!

***

Ogoow marwalba waxaad ii ahaan doonntaa sirteyda ugu muhiimsan ee aan dadka oo dhan ka qariyo, iyo nimcadda ugu weyn ee aan ka baqo in aan waayo!

***

Ogoow in aan ku jeclaaday in ka badan inta sawineyso adiga!

***

Ma ogtahay xiisaha aan kuu xiisaayo in lagu soo koobi Karin eray, indhaheyga oo kaliya fiiri iyaga ayaa kuu sheegi doonno sheekada oo dhan'e!

***

Badanaa waxa aad ku fikirtaa dadka oo dhan in ay ku jecel yihiin, balse dadka waxa ay ku daneeyaan marka ay wax kaaga baahan yihiin oo kaliya,

waxba haku farxin daneyntoda iyo jaceylkooda beenta ah!

Dhamaad



U QOR IYADA

Sideen ahaa sideese Noqday?!
Waxa aan lamid noqday qof waalan oo aan waxba ogeyn, sideen wax ku ogaadaa iyada ayaaba ah wax iigu muhiimsan ee aan heysto'ee, sideen wax isku weydiiyaa, ma su'aal ayaa ii furan? Adinkun waxa aad iweydiineysaan sababta aan u jeclaaday! Waayoo waxa ay igu soo jiidatay codkeeda marwalbana waxa aan rajeyn jiray in aan agteeda wax uun ka noqdo!

Qoraa
Muxammad Al Baqer

Tarjume
Muxammad Cabdi Faarax